


B R Y C S

WADA SHEEKAYSIGA BULSHADA

CODAD WADA JIR AH OO LOOGU TALOGALAY HORUMARINTA DARYEELKA IYO
YARAYNTA KHATARTA GUDNIINKA GABDHABA

Korinta Gabar



Buuggyaraha loogu talogalay Hooyooyinka iyo
Gabdhaha Wakhti dhow yimid

Ayada oo si
Khaas ah Diirada
loo saarayo Wada
sheekaysiga ku
saabsan
Gudniinka
Gabdhaha

Korinta Gabar

Buuggan waxaa iska leh

Warqad loogu talogalay Hooyada

Qaali Hooyo,

Gabadhaada waxay galaysaa marxalad cusub oo nolosheeda ah, mid keeni doonta farxad iyo wareer labaduba. Ayadu weli waa ilmo yar, hase ahaatee waxay si dhakhso ah u noqonaysaa qof weyn. Wakhtigan, adduunkeeda waa mid si dhakhso ah isku bedelaya. Saaxiibadeeda waxay noqonayaan kuwo aad u adag, mas'uuliyadaheeda guriga iyo iskuulka waxay noqonayaan kuwo aad u baddan, jirkeeda wuu isbedelayaa (haddiiba aanan hore isku bedelin, wuu isbedeli doonaa goordhow!). Waxaa hubaal ah in ay la kulmayso isbedel dabeecadeeda ah oona doonayso xuriyad baddan oo isku filnaansho ah wakhtiga ay dhici karto in aadan diyaar u ahayn in aad siiso xuriyad baddan oo isku filnaansho ah. Intaan oo dhan waxaa ka daran ayada iyo qoyskaaga oo dhan waxaad la kulmaysaan dhaqan cusub, luuqad cusub, iyo nolol aad ku noolaataan dalka Maraykanka!

Wakhtigan wuxuu noqon karaa mid ay ku adagtahay hooyooyinka iyo gabdhahaba in ay si wada jir ah iskula noolaadaan. Laakiin xusuusnoow, adigaba waxaad soo martay isla arimahaan oo kale midaas darteedna, waxaad u noqon kartaa gabadhaada xog ay ku tiirsanaato. Hubaal adiga waad xusuusataa markii aad dareentay cadaadiska la qabsashada bulshada, isbedelka jirka ee aan raaxada lahayn, iyo farxada in la helo xuriyada isku filnaansho cusub. Sidoo kale midaan waxay noqon kartaa markii aad martay ama laguugu sameeyay Gudniinka Gabdhaha (FGC). Gudaha dalka Maraykanka, Gudniinka Gabdhaha waa mid aan aad ugu badhnayn waxaana loo tixgelinayaa in uu yahay mid sharci daro ah sababtoo ah wuxuu dhibaato u gaysanayaa dumarka iyo gabdhaha. Si kastaba, dhaqanka ah in la xuso u gudbida gabadha ay u gudbayso dumarnimo waa mid gooni ah sidoo kale waa shay ay khasab tahay in lasii wado oo loo dabaal dego lana sharfo ayada oo sidaasha loo samaynayo qaab wanaagsan, oo aan jirin hawsha Gudniinka Gabdhaha.

Haddii aad ka timid dhaqan lagu samaynayo Gudniinka Gabdhaha, waxaynu rajaynayaa in uu buuggaan kuu noqdo caawimaad kugu haga ka hadlida samaynta gudniinka, in aad tixgelisid waxyaabaha kale ee bedelka u ah Gudniinka Gabdhaha, oona ka fikirtid mowduucyada kale ee xiriirka la leh kuwaas oo saamaynaya gabdhaha marka ay ku sugaryihiin da'daan oo kale. In laga hadlo waxyaabahaan oo kale waxay noqonaysaa mid aan raaxo lagu dareemirin, laakiin waa muhiim in ay gabadhaadu adiga kaa maqasho, oona wada sheekaysigaan uu dhaco hadda, bedelkiib loo dhigi lahaa. Buuggaan ayaana midaasi kugu caawinaya! Mowduucyada waxay diirada saarayaan waxyaabaha ay gabdhuhu la kulmi karaan kahor-inta aysan qaan gaarin sida baaluqnimada iyo isbedelka jirka, xiriirada ay la yeeshaan saaxiibadooda, xiriirada jacayl, sidoo kale mowduucyo xiriir la leh Gudniinka Gabdhaha.

Xusuusnoow, adigu marwalba ma garan kartid jawaabaha su'aalaha ay gabadhaada ku weydiiso, laakiin waxaad haysataa awooda ah in aad dhagaysatid kadibna ku caawisid in ay ka gudubto marxaladaan cusub ee nolosheeda ah iyo dhaqankaan cusub. Waxaa aad muhiim u ah, anagu waxaynu ku rajo weynahay in bogg kasta uu kugu caawiyo in aad samaysatid fursad aad si fiican isugu barataan, kugu caawiyo in aad samaysatid caado xiriir wanaagsan ah, oona xoojiyo xiriirkiina intiiba ay gabadhaadu sii korayso.

—BRYCS

Warqad loogu talogalay Gabadha

Gabadha Qaalida ah,

Adigu waxaad galaysaa markalad cusub oo noloshaada ah, mid ay ka buuxaan dhammaan farxad iyo caqabadba. Adiga waxaad ka baxaysaa carruurnimadii waxaadna noqonaysaa dhallinyaro. Sida aad awalba u ogtahay si khibrad ahaan, qaan gaarnimadu waxay kuu horseedi doontaa tooska isbedelo jireed iyo dareen. Jirkaaga wuxuu isku bedelayaa si dhakhso ah. Saaxiibadaadu waxay noqonayaan kuwo aad muhiim u ah. Sidoo kale adiga waxaad leedahay mas'uuliyado cusub oo guriga iyo iskuulka ah waxaadna gaaraysaa oona doonaysaa xuriyad isku filnaan ah! Intaas waxaa sii dheer, adiga iyo qoyskaaga waxaad la kulmaysaan nolosha dalka Maraykanka ah iyo sida loogu noolaado dhaqan cusub.

Waxay u egtahay in hooyadaada aysan fahmin ama garanin waxyabaha aad la kulmaysid ama maraysid, laakiin xusuusnoow, ayadu lafteeedu mar ayay ahayd dhallinyaro. Ayadu waxay xusuusataa dareen raaxo la'aan ah oo ku saabsan isbedelka jirkaaga, cadaadiska saaxiibada, iyo rabitaanka xuriyad baddan oo isku filnaansho ah. Ayadu waxay kuu noqon kartaa xog caawimaad kuu leh!

In lagala hadlo hooyadaada mowduucyo gaar ah sida xirashada rajabeetoo yinka, in aad qof u qaadid dareen jacaylnimo ah, dhaqamo hiddo sida Gudniinka Gabdhaha (FGC), in uu kugu dhaco dhiigaaga caadada, iyo in aad ka dareentid cadaadis dhinaca saaxiibadaada waa mid kaa dhigaysa in aad dareentid xishood iyo cabsi. Laakiin waa muhiim in aad hooyadaada la hadashid ayaduna kula hadasho. Hadda kala hadal waxyabahaan, bedelkiid aad dib u dhigi lahayd.

Buuggaan waxaa loogu talogalay in uu kugu caawiyo adiga iyo hooyadaada in aad kawada hadashiin waxyaboo ku saabsan mowduucyadaan. Inbaddan oo kamid ah boggagaan ka kooban buuggyarahaan waxay leeyihiiin qayb loogu talogalay hooyoo yinka iyo qayb loogu talogalay gabdhaha. Sidoo kale waxaa kamid ah hawlo kala duwan oo adiga iyo hooyadaada aad u samayn kartaan si wada jir ah iyo meeloo yin aad wax ku qortid oona uga jawaabitid su'aalaha.

Waxaynu ku rajo weynahay in buuggyarahaan uu kuu oggolaado in aad u furnaatid hooyadaada. Xusuusnoow, in hooyadaadu aysan marwalba garan karin jawaabaha su'aalahaaga, laakiin waxaad wax ka baran kartaa xikmadeeda oona baaritaan ugu samayn kartaan markaladaan cusub ee noloshaada ah iyo dhaqankaan cusub si wada jir ah. Waxaa aad muhiim u ah, anagu waxaynu ku rajo weynahay in bogg kasta uu kugu caawiyo in aad samaysatid fursad aad si fiican isugu barataan, in aad samaysatid caado xiriir wanaagsan ah, oona xoojiyo xiriirkina.

—BRYCS

Halyeeyga

Buuggaan waxaa loo qaybiyay qaybo loogu talogalay hooyooyinka, gabdhaha, iyo hawlo loo samayn karo si wada jir ah.

Calaamadahaan waxay kuu oggolaanayaan in aad oggaatid nooca boggaga adiga laguugu talogalay!

Hooyada 

Gabadha 

Hooyada iyo Gabadha 

Tusmada Buugga

Korinta	i
Maxaa laga wadaa Gudniinka Gabdhaha (FGC)?	3
In si Wada jir ah aad uga hadashaan waxyaabaha ku saabsan Gudniinka Gabdhaha	4
Jirka Isbedelaya ee Gabadha	9
Saameynta Caafimaadka ee uu leeyahay Gudniinka Gabdhaha.....	18
Waxa la filanayo in lala kulmo marka loo Tagayo Dhakhtarka.....	20
Barashada Galmada ee ka dhacda Iskuulada.....	27
In lala sameeyo Xiriiro Wanaagsan Saaxiibada	34
Xiriirada Jacayl ee Mustaqbalka ah iyo Guurka	40
Caadooyinka Bedelka ah ee Gelida Qaan gaarnimada	45
Qaabab looga Qayb qaadan karo U doodista Lidka ku ah Gudniinka Gabdhaha... <td>56</td>	56
Mahad naqa	63
Lifaaqa	Gudaha Daboolka dambe



Afeef ku saabsan Sharci ahaanta Gudniinka Gabdhaha


Buuggaan wuxuu ka hadlayaa mowduuca qaan gaarnimada, koritaanka wanaagsan ee kahor qaan gaarka, iyo Gudniinka Gabdhaha (FGC), sidoo kale lagu magacaabo gudniinka. Gudniinka Gabdhaha waa mid sharci daro ka ah Dalka Maraykanka. Waa sharci daro in la sameeyo ama qof lagu caawiyo in uu sameeyo Gudniinka Gabdhaha qofkasta oo da'diisu ka yartahay 18 sanno. Dalka Maraykanka, iyo waddamo baddan oo adduunka kamid ah, waxay u tixgelinayaan Gudniinka Gabdhaha in uu yahay xad gudub lagu xad gudbo xuquuqaha aadanaha, rabshad-kusalaysan nooca qofka, iyo in uu yahay nooc kamid ah xad gudubka loo gaysto ilmaha. In loo safro dibada Dalka Maraykanka ama in la isku dayo in loo safro dibada Dalka Maraykanka midaas oo ah ujeeddooyin loogu samaynayo gabadha Gudniinka Gabdhaha waa mid sidoo kale kasoo horjeeda sharciga.

Haddii aad samaysid Gudniinka Gabdhaha kahor inta aadan imaanin Dalka Maraykanka adiga **kuma lihid wax dembi ah** mana aadan ku xad gudbin wax shariiyada Dalka Maraykanka ah. Sharciga federaalka wuxuu ka dhigayaa midab takoorka mid lid ku ah qofkasta oo sameeya Gudniinka Gabdhaha in ay tahay mid sharci daro ah. Inbaddan oo kamid ah gabdhaha waxaa lagu khasbay Gudniinka Gabdhaha ayaga oo aan lahayn wax doorasho ah.

Hooyooyinka iyo Gabdhaha

Buuggaan waxaa loogu talogalay labadiina in aad ku qortiin. Kahor inta aadan bilaabin, kaalay aynu xusuusano meeshaan in ay tahay meal loogu talogalay dhammaantiina si aad u sheegtaan fikradhiiina oona u sheegtiin si daacadrimo ah. Waxaa jira hawlo baddan iyo su'aalooyin idin ku caawinaya in aad bilowdiin wada sheekaysiga. Wuxaan idin ku boorinaynaa in aad wakhtigiina qaadatiin oona buuxisaan buuggaan si aad isku barataan!

Sawirkaan hoose, sawir ama geli sawir labadiina ah!



Waxyaabaha ku saabsan Adiga iyo Aniga

Hooyooyinka iyo Gabdhaha

Midkasta oo idin kamid ah, wuxuu koobab gelinayaa shan erey oo adiga ku tilmaamaya. Kadibna, ayada oo la isticmaalayo midab gooni ah, koobaab geli shan erey oo tilmaamaya qofka kale.

Hansare leh

Ku dhiirashada khatarta

Dad ka qosliya

CAAWIMAAD LEH

Awood baddan

Go'aan adag

Naxariis baddan

Samir baddan

Aamin

Geesi

Deeqsi ah

Jacayl baddan

Degan

Faraxsan

La isku halayn karo

Saaxiibtinomo leh

Dadka ka fikira

Daacad ah

Fir-fircoo

Hadal baddan

Maxaad u dooratay ereyadaan si aad isugu tilmaantaan?

Muxuu yahay shayga ugu fiican ee aad isku jeceshihiin?

